

Qorshe ma leedahay?

Maxaa dhici kara haddii ilmahaagu guriga yimaado isaga oo ka imaanaya dugsi oo aadan adiguna halkaasi joogin?

Maxaa dhacaya haddii aanan si ku talagal ahayn lagu hayo oo aadan soo wici karin si aad dugsi ula socodsiiiso in aad soo daahayso ama haba yaraatee aadan awoodin in aad ilmaha qaado?

Ilmahaagu ma garan lahaa wuxuu sameeyo?

Qaadashada wakhtiga hada la qaadanayo si loo sameeyo qorshe qoys oo loogu talagalay xaaladaha noocan ah ee suurta galka ah in ay dhacaan waxay ilmahaaga ka caawin kartaa in uu qaato go'aan badbaado leh isla markaana toosan haddiiba ay dhacdo xaalad degdeg ahi.

Qorshaha Xaalada Degdega ee Qoyska waa in ay ku jiraan:

- Lambarada telefoonada iyo tilmaamaha la raacayo ee sida ilmahaagu u wici karo xubin qoyska ka tirsan ama saaxiib qoyska u dhow oo maalintii la helayo si uu ugu yimaado oo uu ula joogo ilmahaaga ama ilmahaaga u qaadi karo gurigiisa ilaa adiga lagu helayo.
- Lambarka telefoonka ee dugsi ilmahaaga iyo tilmaamaha la raacayo si loo waco dugsi haddii aanay heli karin xubin qoyska ka tirsan ama saaxiib qoyska u dhow. Qof ka socda dugsi ayaa iman kara isla markaana hayn kara ilmahaaga sidoo kalena isaga/iyada dib ugu u qaadi kara guriga ama goob ammaan ah oo leh qof weyn oo si ku habboon wax ula socon kara.
- Macluumaadka cusub oo la iskala soo xiriirayo ee loogu talagalay xaalada degdega ah oo ay la socdan lambarada telefoonka ee guriga, gacanta iyo shaqada ee xubin kasta oo qoyska ka tirsan.

Waxaad xaqiijisaa in dugsi ilmahaagu haysto lambarkaaga telefoonka xaalada degdega ah ee lagaala soo xiriirayo iyo lambarada telefoonka xaalada degdega ee lagaala soo xiriirayo dadka diiwaanka ku jira.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan samaynta qorshaha degdega ah ee qoyska, booqo <https://emergency.cdc.gov/preparedness/plan/>.